EVERY CASUALTY COUNTS

Heerarka loogu talagalay diiwaangalint khasaaraha: soo koobid

Tusmada

HEERARKA LOOGU TALAGALAY DIIWAANGALINT KHASAARAHA: SOO KOOBID 2

MABAADI'DA DIIWAANGALINTA KHASAARAHA 3

1. **Hagaysan waxyeelo** 3
2. **Hufnaan** 3
3. **Loo dhanyahay** 3
4. **Iswaafaqsan** 3
5. **Xilkasnimo** 3

UJEEDDOOYINKA URURINTA XOGTA AASAASIGA AH EE LOOGU TALAGALAY DIIWAANGELIYEYAASHA KHASAARAHA. 4

1. **Hufnaanta Hey'adeed** 5
2. **Habka** 5
3. **Qeexitaanada iyo Qaybaha** 6
4. **Amni** 6
5. **Daabacaadda Xogta Diiwaangelinta Khasaaraha** 7

EVERY CASUALTY COUNTS

HEERARKA LOOGU TALAGALAY DIIWAANGALINT KHASAARAHA: SOO KOOBID

Dukumintigan waa soo koobid gaaban, fudud oo lahelikaro kaasoo ah *Heerarka Loogu talagalay Diiwaangelinta Khasaaraha* Dukumentigan oo dhamaystiran waxaa laga heli karaa www.everycasualty.org.

Heerarka loogu talagalay Diiwaangelinta Khasaaraha waxaa soo saaray shabakada diiwaan galiyayaasha Khasaaraha ee Khasaare Kasta Waa Latiriyaa si loo dhiiragaliyo nidaamka ugu wanaagsan iyo dhiiragelinta wada shaqeynta sidoo kale loo awoodo adeegsiga balaaran ee shaqada diiwaangeliyeyaasha. Iyaga looguma talagalin in loo isticmaalo hagitaan howleed. Taas badalkeed, Heerarka ayaa looga dan leeyahay in lagu dhiiragaliyo diiwaangeliyeyaasha khasaaraha in ey tixgaliyaan dhinacyada muhiimka ah ee nidaamka wanaagsan iyo sida kuwani loogu dabaqi karo mashruucooda diiwaan galinta khasaaraha.

Sidoo kale caawinta xirfadlayaasha diiwaangelinta khasaaraha, heerarkan ayaa ujeedkoodu yahay inay ka dhigaan xogta khasaaraha mid ey sahlantahay in la isticmaalo lana wadaago. Waxey adeegsadayaasha xogta khasaaraha siiyaan ujeeddo, shuruudo laqiyaasi karo taasoo kacaawineysa iyaga iney go'aansadaan sida loo adeegsado xogta khasaaraha ey soo bandhigeen ilo kala duwan.

Si loo balaariyo gaarista iyo isticmaalka Heerarka, soo koobiddan ayaa loo tarjumay luuqado inta badan ey khuseeyso diiwaangeliyeyaasha khasaaraha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka. Macluumaad iyo waxyaabo dheeri ah, fadlan la xiriir Khasaare Kasta ee Adduunka Ka Dhaca.

MABAADI'DA DIIWAANGALINTA KHASAARAHA

Shan mabaadi' oo asaasi ah ayaa lagu heshiiyay inta lagu gudajiray horumarinta Heerarka. Dhammaan heerarka lagu soo bandhigay halkan waxaa lagu ogeysiiyey mabaadi'daan, waana in lagu taageeraa inta lagu jiro shaqada mashruuc kasta.

1. Hagaysan waxyeelo

Ka fogaanshaha waxyeelo dheeraad ah oo loo geysto noolaha waa mabda'a aasaasiga ah ee diiwaangelinta khasaaraha oo laga soo qaatay anshaxa caafimaadka, taasoo kahor iman karta afarta mabaadi'da kale. Waxay khuseysaa dhammaan dhinacyada diiwangelinta khasaaraha, laga soo bilaabo xog ururinta illaa nidaamyada amniga iyo daabacaadda xogta.

2. Hufnaan

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa inay noqdaan kuwo sida ugu macquulsan kahufan dhammaan dhinacyada waxqabadyadooda, oo ay kujiraan qaabdhismeedka hey'adeed, Hab-nidaamka iyo nidaamyada amniga ee shaqaalaha, markhaatiyaasha iyo xogta. Hufnaan ayaa kobcisa kalsoonida xogta, waxay gacan ka geysaneysaa hubinta in si sax ah loo turjumay, waxayna dhiirigelisaa baaritaan waxtar leh.

3. Loo dhanyahay

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha maaha inay siyaasad ahaan dhexdhexaad ka ahaadaan, laakiin waa inay ku dadaalaan inay ku daraan dhammaan dhacdooyinka iyo dilalka ka dhaca mashruuca dhexdiisa, iyadoo la adeegsanayo qeexitaannada si siman ukhuseeya dhamaan dhinacyada. Diiwangeliyeyaasha khasaaraha waa inay si cad u sheegaan xogta, haddii ay jirto, ay ka reebayaan diiwaangelintooda iyo sababta. Tan waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan, dhibaatooyinka kasoo ururinta macluumaadka bulshada kasoo horjeedda siyaasadda ama taabacsanaanta bulsheed ee diiwaangeliyaha khasaaraha.

4. Iswaafaqsan

Iswaafaqsanaanta, gaar ahaan hababka xog ururinta iyo kashaqeynta, ayaa muhiim u ah hubinta in diiwaanada khasaaraha loo isticmaali karo isbarbardhigyo macno leh waqtiga iyo goobtaba. Hadii ay wax iska badalaan habraacii diiwaan galinta shilalka sababo iyo duruuf soo timid awgeed, diiwaan galiyayaashu waa inay sitaxadar leh wax uqiimeeyaan,sicadna wa'inay ugu muujiyaan qoraalkooda,si loo xaqiijiyo warbixin tayadeedu sarayso oo aan iska hor imaanayn.

5. Xilkasnimo

Diiwaan galiyaasha shilalka waa udhaqmaan si xilkasnimo leh mas'uuliyad leh dhamaan markii ay lafalgalayaan kuwa shilka uu soo gaaray,sidoo kale waa inay xilkasnimo muujiyaan dhanka wixii dhaqaalo ama qalab ah ee loo dhiibay ama shaqaalaha ay lashaqeeynayaan. Gudashada masuuliyadu waa inay noqotaa mid daahfuran oo la arki karo, si loo dhiso kalsoonida kuwa bixinaya sidoo kale adeegsanaya macluumaadkooda.

UJEEDDOOYINKA URURINTA XOGTA AASAASIGA AH EE LOOGU TALAGALAY DIIWAANGELIYEYAASHA KHASAARAHA.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxay dejiyaan shuruudaha ururinta macluumaadka si waafaqsan himilooyinka gaarka ah ee mashruucooda. Si kastaba ha noqotee, waxaa jira xirmo ugu yar oo macluumaad aasaasi ah taasoo ay tahay in dhammaan diiwaangeliyeyaasha khasaaraha ay ku dedaalaan inay ku daraan. Kuwani waa:

UJEEDDOOYINKA URUURINTA XOGTA ASAASIGA AH	
Goobta	Diiwaanka gali heerka ugu sareeya ee faahfaahinta laheli karo, tusaale ahaan magaca magaalada ama tuulada ama xataa iskuduwaha GPS haday suurtagal tahay.
Taariikhda/ Wakhtiga	Diiwaanka gali heerka faahfaahineed ee ugu sareeya lana heli karo, oo ay ka mid yihiin taariikhda iyo wakhtiga hadii lagaranayo.
Ilaha	Diiwaan geli qaybaha xigashooyinka sida warbixinnada wararka, dukumiintiyada rasmiga ah, isku-soo-uruurinta-ilaha, ama qoraal markhaati. Ilaha waa in sida badan la hayaa, iyadoo leh xidhiidho diiwaanka khasaaraha. Ilaha xaasaasiga ah, sida cadeynta markhaati, waa in la ilaaliyaa.
Tirada khasaaraha	Marka la aqoonsanayo macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka lagu dilay dhacdo gaar ah aan laheli karin, udiiwaangeli tirada dhibbanayaasha qiyaas ku-meel-gaar ahaan illaa laga heli karo faahfaahin dheeri ah.
Magaca	Diiwaanka gali magaca khasaare kasta, adigoo isticmaalaya aqoonta dhaw ee heshiisyada magac bixinta deegaanka. Hubso inay suurtagal tahay in lagu daro magacyo kala duwan ee isla shaqsiga marka ey laga maarmaanka tahay (tusaale ahaan, naanaysyada ama magaca garashada).
Da'da	Diiwanka gali taariikhda dhalashada dhibane kasta, ama da'da xiliga dhimashadooda ama la waayey. Hadii aan macluumaadkan la heli karin, diiwaanka gali in dhibanuhu uu ahaa cunug ama qof weyn adigoo isticmaalaya shuruudo daahfurnaan ah oo iswaafaqsan ah. Qaybaha kale sida ilmaha, dhalaanka, dhalinyarta, ama qofka wayn, waa in si iswaafaqsan loogu dabaqaa hadii la isticmaalo.
Jinsiga / Jinsiga	Diiwan gali Jinsiga/jinsiga qof waliba markasta oo ay suurtagal tahay.
Faahfaahinta dhimashada	Macluumaadkan waxa loo habeyn karaa siyaabo kala duwan, tusaale ahaan hub ahaan, dhimashada sabab caafimaad ama sharaxaada dhacdada.
Kaqeybgalayaasha ku lugta leh	Diiwaan gali kooxaha iyo / ama shakhsiyaadka lasoo sheegay in ay ku lug lahaayeen dhacdada, oo ay ka mid yihiin dhinacyada is haya ee xaadirka ah iyo kooxaha ama shakhsiyaadka sheegta masuuliyada.

HEERARKA DIIWANGALINTA KHASAARAHA

1. Hufnaanta Hey'adeed

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxaa waajib ah iney markasta:

- noqdaan kuwo ku hufan himiladooda iyo dhiirrigelintooda diiwaangelinta.
- kayeelaan macluumaadka ku saabsan hababkooda mid hufan oo si guud loo heli karo.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa iney isku dayaan iney:

- bixiyaan macluumaad ku saabsan siyaasad ama xiriirro kale oo dheelitiraya masuuliyadooda diiwaangelin loo dhan yahay.
- kadhigaan qaab dhismeedka hey'adooda mid hufan oo ay heli karaan dhamaan saamileyda.
- kadhigaan macluumaadka deeqbixiyayaasha mid hufan oo si guud loo heli karo.

2. Habka

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxaa waajib ah iney markasta:

- lahaadaan habab cad oo ay kula macaamilaan cadeynta dukumiinteriga iyo qoraalada markhaatiga labadaba.
- lahaadaan nidaam iswaafaqsan oo si habeysan loo abaabulay oo loogu talagalay ka-shaqeynta macluumaadka, iyadoo sidoo kale loo dhaafayo qiimeynta aadanaha iyo dabacsanaanta.
- si nidaamsan udiiwaangeliyaan qeybaha macluumaadka cayiman.
- lahaadaan hannaan lagu xaqiijiyo laguna qiimeeyo xogta la soo ururiyay.
- Lahaadaan nidaam loogu tala galay xalinta is-af-garanwaaga udhexeeya ilaha.
- Lahaan wadooyin looga fogaanayo ama lagu xaliyo diiwaangelinta labada jeer ah.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa iney isku dayaan iney:

- diiwaangelin kasta u isticmaalaan ilo badan oo kala madax banaan ilaa xadka suuragalka ah.
- ka warqabaan dhammaan ilaha suurtagalka ah ee ay heli karaan, iyo xooggooda iyo xaddidnaantooda.
- tixgeliyaan isticmaalka cabirka qiimeynta si ey u qiimeeyaan kalsoonida xigasho kasta, una furan dib u eegis.
- diidin ilo kasta oo bixin kara macluumaad la xiriira, xitaa haddii macluumaadka la bixiyay uu aad u yar yahay.
- kaydiyaan dhukumanti kasta oo la xidhiidha.
- ujeedadoodu tahay inay ku xaqiijiyaan xogtooda xigashooyin badan oo madax-bannaan.
- sameeyaan habraacyo si loo xaqiijiyo gelinta xog iswaafaqsan.
- kadhigaan dhammaan xogta lagaliyay mid ufuran saxitaan iyo kudarista macluumaad cusub.
- kala qeybiyaan nidaamka diiwaangelinta khasaaraha ee udhexeeya dad kala duwan si loo fududeeyo shaqada sidoo kale loo yareeyo khaladaadka bini'aadamka.

- tixgaliyaan iney xubno shaqaalaha ah dib u eegis ku sameeyaan xogta midba midka kale kahor inta aan la xaqiijin dhacdo/shakhsi.

3. Qeexitaanada iyo Qaybaha

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxaa waajib ah iney markasta:

- dejiyaan shuruudo ka mid noqoshada iyo ka saarista oo cad, kuwaasoo si furan loo sharxay.
- doortaan qeexitaannada iyo qaybaha ku habboon xaaladdooda iyo ujeedadooda.
- go'aansadaan gogol-dhigga bilowga ah ee qodobadamacluumaadka, qaybaha, iyo qeexitaannada ka hor inta aan la bilaabin hal-abuurka diiwaangelinta khasaaraha sidoo kale si iswaafaqsan kuwaan loogu dabaqo h geeddi-socodka diiwagelinya.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa iney isku dayaan inay:

- ikhtiyaar u yeeshaan inay ku sifeeyaan macluumaadka inay yihiin "kuwo aan la hubin" ama "ku meel gaar ah" marka ay xaaladdu sidaas tahay.
- tixgeliyaan arrimaha kala-saarista marka la dhisayo keydka-macluumaadka.
- diiwaangeliyeaan dhimashada shakhsiyaadka aan la aqoonsan illaa heerka faahfaahinta suuragalka ah.
- latashadaan iyo / ama uruuriyaan keydka-macluumaadka dadka la la'yahay, si ay gacan uga geysato caddeynta halka ay ku dambeeyaan khasaaraha aan la aqoonsan.

4. Amni

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxaa waajib ah iney markasta:

- kawarqabaan in halistu is beddelayso oo ey aqoonsadaan khataraha gaarka ah ee kulifaaqan marxalad kasta oo ka mid ah wareegga diiwaagelinta khasaaraha.
- helaan oggolaansho la ogeysiiyey markhaatiyaasha ku habboon dhamaan ujeeddooyinka loo isticmaali doono macluumaadkooda.
- si cad u qeexaan xiriirka dhammaan xubnaha shaqaalaha iyada oo loo marayo heshiisyo qoraal ama af ah, oo ubaahan sir-ilaalin iyo gaar ahaansho marka ay habboon tahay.
- hubiyaan in dhammaan shaqaaluhu ka warqabaan, fahmaan, oggolaadaan oo ay marin u helaan tallaabooyinka amniga ee lameelmariyay si loo ilaaliyo iyaga.
- hormariyaan oo ey bixiyaan borotokoollada amniga shaqaalahooda, oo ay ku jiraan tababarka sida loogu baahan yahay.
- dammaanad qaadaan heerka helitaanka taageerada nafsaaniga ah ee shaqaalahooda.
- leeyihiin qorshe kaydinta xog kahor intaanay bilaabin ururinta xogta, oo ay ku jiraan qodobada kaydinta.

- xisaabtamaan arrimaha sharciga, tikniyoolajiyadda iyo aadanaha marka laga hadlayo arrimaha amniga xogta, oo ay ku jiraan sharciyada ilaalinta xogta.
- si cad u qeexaan shuruudaha amniga xogtooda markay xogta la wadaagayaan saamileyda kale.
- qorsheeyaan suurtagalnimada xadgudub xogeed.
- si qoto dheer u qiimeeyaan in qalabka ay adeegsadaan uu waafaqsan yahay ujeedooyinka amniga xogtooda.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa iney isku dayaan inay:

- sameeyaan qiimeyn khatareed oo joogto ah si loo hubiyo amniga dadka ay ku lug leeyihiin howlahooda diiwaangelinta khasaaraha.
- falanqeeyaan khatarta ku lifaaqan nooca xogta ay aruuriyaan.
- kaliya ururiyaan macluumaadka ay u baahanyihiin isla markaana ilaalin kara si habboon.
- kawarhayaan bixiyeyaasha gargaarka bani'aadamnimada iyo taageerada xuquuqda aadanaha ee aagga ay ka howlgalaan, sidaa darteed waxay caawinaad ugu hagi karaan markhaatiyaasha iyaga sida loogu baahdo.
- Bixiyaan heerar kala duwan oo lagu heli karo xogta xasaasiga ah ee ururka dhexdiisa ah, iyadoo loo eegayo baahida loo qabo in la ogaado.
- qorsheeyaan sida ay u keydin doonaan xogtooda marka mashruucu dhammaado.

5. Daabacaadda Xogta Diiwaangelinta Khasaaraha

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waxaa waajib ah iney markasta:

- calaamadeeyaan haddii / marka macluumaadka la daabacay si aan ku filnayn loo xaqiijiyo in loo tixgeliyo in si buuxda loo xaqiijiyay.

Diiwaangeliyeyaasha khasaaraha waa iney isku dayaan inay:

- tixgeliyaan dhammaan dariiqooyinka ay xogtooda waxtar u yeelan karto, iyo cidda ay utahay, marka la go'aaminayo waxa la daabacayo.
- Cadeeyaan sababaha ay u go'aansanayaan in aan la daabicin xog gaar ah.
- wadareeyaan xogta la daabacay iyadoo la waafajinayo ujeeddooyinka mashruuca laakiin ey had iyo jeer maskaxda ku hayaan ujeeddada kama dambaysta ah ee lagu aqoonsanayo khasaare kasta.
- qiimeeyaan oo aqoonsadaan siyaabaha ugu wax ku oolka si ey ugudbiyaan xogtooda.
- had iyo jeer isku dayaan iney ku daabacaan xogtooda luqadda (ha) maxalliga gobolka ee hawlahooda ku saleysanyihiin.
- tixgeliyaan sameynta waxqabadyo wacyigalin ah si ay xogtooda ugu soo jiitaan dhagaystayaasha bartilmaameedka muhiimka ah.

- Ku dadaalaan iney wadagaan xogtooda sida ugu ballaaran ee suurtogalka ah si looga fogaado soo laba celinta shaqo isku mid ah, laakiin ey go'aansadaan heerka faahfaahinta ay bixin doonaan iyadoo lagu saleynayo hadba xaalad kasta sidey tahay.